**Si aad u soo Sheegto Gaboodfalka iyo Dayaca Ilmaha Wac 1-800-452-1999 ama**

**Isticmaalayaasha TTY: La hadal 711 (Maine Relay)**

### Waa maxay xuquuqda ilmahayga?

Dhammaan carruurta waxay leeyihiin baahida iyo xaqa in la kobciyo oo ay si badbaado ah ugu noolaadaan guryahooda. Waxay xaq u leeyihiin:

- badbaado iyo kormeer.
- cunto, dhar, iyo hoy.
- ka ilaalinta gaboodfal jidheed, galmo, iyo dareen ama dayac.
- ogaanshaha iyo daawaynta xaaladaha caafimaad iyo dareen.

Carruurta ah kuwa maxkamadi ka soo saartay amar la xiriira ilaalinta carruurta waxay leeyihiin xuquuq dheeraad ah. Xuquuqdaas waxaa ka mid ah:

- Inay booqdaan ama uu soo booqdo waalidku iyo/ama walaalaha, haddii ilmuhu ku jiro xannaanada korinta iyo haddii booqashadaay ku jirto danaha ugu wanaagsan ee ilmaha.
- Inuu helo qof loo yaqaan *wakiil* oo maxkamad u magacawday si uu uga shaqeeyaha danaha ugu fiican ee ilmaha.

### Waa maxay xuquuqdayda?

Haddii aad tahay waalid ama daryeel bixiye baaritaan ilaalinta carruurta ah, waxaad xaq u leedahay inaad ogaato:

- nooca gaboodfalka ama dayaca ilmaha la soo sheegay.
- sida baaritaanka loo qabanayo iyo muddada uu qaadanayo.
- khatarta la tuhunsan yahay ama halista waxyeelada ku waajahan ilmaha.
- waxa shaqaalaha kiiska ogaaday ee la xiriira xadgudubka ama dayacaada carruurta ee la soo sheegay.
- waxa dhici kara iyadoo ay sabab u tahay natiijada baaritaanka.
- tallaabada ay qaadi karto Adeegyada Ilaalinta Ilmaha, haddii ay jirto.
- in sharciga Indian Child Welfare Act uu ku khuseeyo adiga ama ilmahaaga, haddii adiga ama ilmahaagu haysto hiddaha Hindida Maraykanka.

Xuquuqda dheeraadka ah ee waalidiinta iyo daryeelayaasha:

- in aad dib u-eegto xogtaada iyadoo ku sar-go'aan sharciga iyo nidaamka.
- inaad ku darto warbixin diiwaankaaga, inaad dibu eegto wixii jawaab ah ee shaqaalahayaga iyo, inaad dibu eegto oo aad faallo uga bixiso jawaabta.
- inaad haysato qaraabo tixgalin loo siinayo inay yihiin daryeelayaasha kumeel gaadhka ah.
- inaad codsato dibu eegista gudaha guriga ee dayreelkaaga, daawaynta, iyo qorshaha adeegga.
- in dhaqankaaga iyo hiddahaaga la xushmeeyo.
- inaad muujiso oo aad dabbaqdo diintaada iyo caqiidadaada.
- inaad ku codsato macluumaadkan luuqaddaada ama Farta Indhoolaha, ama inaad codsato tarjumaad luuqaddaada ku hadla ama Luuqadda Calaamadaha ee Ameerikaanka.
- inaad heshid caawimaad isgaarsiineed haddii aad leedahay baahiyo gaar ah oo ay kugu adag tahay inaad sheegto adeegga aad u baahan tahay, oo ay kujirto caawimo akhriska iyo qorista.
- inaad diido wax ah adeeg, daawayn, ama daawooyin, haddii uusan sharciga ama maxkamadi waajib ka dhigin, iyo in laguu sheegi wixii ka dhalan kara diidmadaas.
- in lagugu wargaliyo kahor inta aanad wadaagin macluumaadka qarsoodiga ah ama gaarka ah, oo ku saabsan duruufaha aan caadiga ahayn marka ay hay'addu noqon karto sharci ahaan ama anshax ahaan mid looga baahan yahay inay fasaxdo macluumaadka noocaas ah.

Waxaan kaa codsanaynaa, adiga oo ah waalid ama daryeele:

- inaad siiso macluumaad sax ah, wakhtiga ku habboon shaqaalaha kiiska si ay kaaga caawiyaan inay kugu xiraan adeegyada habboon.
- kaqaybqaadato dhammaan go'aanada adeegga.
- bixiso oggolaansho xogogaal si aad gacan uga gaysato fududaynta qiimayntaada.

Marka Adeegyada Ilaalinta Ilmaha ay raadinayaan haynta ilmaha iyagoo adeegsanaya tallaabo maxkamadeed, waalidiintu waxay xaq u leeyihiin:

- inay helaan qareen maxkamadda ku matala.
- macluumaadka ku saabsan tallaabo sharciyeed walba oo ku lug leh cunugaaga.
- la siiyo adeegyo dhibaatooyinka gaboodfalka iyo dayaca carruurta.
- leeyihiin qorshe cad, oo qoraal ah oo loogu talogalay adeegyada si looga caawiyo joojinta gaboodfalka iyo dayaca.

- booqdaan ilmahooda ilaa inta booqashada ay ku jirto danaha ugu wanaagsan ee ilmaha.

### Tabashooyinka, Mushkiladaha, U baahan Macluumaad Dheeraad ah - Yaan La Hadli Karaa?

Magaca shaqaalaha kiiska ___________________________

Lambarka telefoonka shaqaalaha kiiska _______________

Kormeeraha shaqaalaha kiiska _______________________

Lambarka telefoonka kormeeraha ______________________

Maamulaha Barnaamijka Daryeelka Ilmaha ee halka aan ku noolahay waa:

Buug-yarahan waa inaad ka heshaa nuqul ka mid ah *Moodada Dabbaqaadda Adeegyada Daryeelka Ilmaha*, kaasoo haga tallaabooyinka shaqaalaha kiiska ee carruurtaada iyo qoysaskaaga.

Sidoo kale waa inaad heshaa nuqulah *Barnaamijka Baadhaha Daryeelka Ilmaha*. Barnaamijka Baadhuhu wuxuu bixiyaa qof tabobaran oo fiiriya cabashooyinka marka aanad awoodin inaad xalliso ammuur la xiriira Adeegyada Ilaalinta Ilmaha/Waaxda Adeegyada Caafimaadka & Aadanaha. Barnaamijka Baadhuhu wuu ka madaxbannaan yahay Adeegyada Ilaalinta Ilmaha /Waaxda Caafimaadka & Adeegyada Aadanaha.

Haddii aadan helin nuqulka buug-yaraha Baaraha, fadlan weydiiso mid shaqaalaha kiiskaaga , ama wac (207)-624-7900 oo weydiiso in mid laguugu soo diro iimaylka. Ama, waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan Barnaamijka Baadhaha hoosta cinwaanka Tabashooyinka ama Cabashooyinka ee websaytkayaga.

**DHHS**
**Ogaysiiska Takoor La'aanta**

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (DHHS) kuma saleeyaan takoorka naafada, sinjiga, midabka, caqiidada, jinsiga, doorashada jinsiga, da'da, ama qofku waddanka uu ka soo jeedo, gelitaanka, helitaanka, ama hawlaha barnaamijyadeeda, adeegyada, ama waxqabadyada, ama hawlaheega shaqaalaynta. Ogaysiiskan waxaa loo bixiyay sida uu dhigayo Title II ee Xeerka Maraykanka ee Naafada ee 1990 iyo sida waafaqsan Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 ee wax ka beddelay, Qaybta 504 ee Xeerka Dhaqancelinta ee 1973, ee wax ka beddelay, Xeerka Takoorka Da'da ee 1975, Title IX ee Wax-ka-beddelka Waxbarashada ee 1972 iyo Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Maine iyo Amarka Fulinta ee ku Saabsan Heshiisyada Adeegyada ee Gobolka Maine. Su'aalaha, tabashooyinka, cabashooyinka ama codsiyada macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ADA waxaa loo gudbin karaa DHHS 'Adaptive Compliance / EEO Coordinators, 11 Station House - 221 State Street, Augusta, Maine 04333, 207-287-4289 (V), 207- 287-3488 (V), isticmaalayaasha TTY waxay wacaan Maine Relay 711. Shakhsiyaadka u baahan gargaar dheeraad ah ee isgaarsiin wax-ku-ool ah ee barnaamijka iyo adeegga DHHS waxa lagu martiqaadayaa inay u sheegaan baahiyahooga iyo waxa ay rabaan ADA Compliance/EEO Coordinators. Ogaysiiskan waxaa lagu heli karaa qaabab kale, marka la codsado.

# MAINE CARES KU SAABSAN CARRUURTA IYO QOYSASKOODA



# HAGAHA ILMAHA ADEEGYADA ILAALINTA

Sanad kasta, 18,000 Carruurta Maine ah ayaa loo sheegaa Adeegyada Ilaalinta Ilmaha (CPS) sababta oo ah tuhun laga qabo jiritaanka gaboodfal ama dayac ilme. Waaxdeena waxa sharcigu farayaa inay:

- ka jawaabaan warbixinada saxda ah
- qiimeeyaan badbaada ilmaha
- taageerada iyo ilaalinta qoysaska, marka ay suurtagal tahay
- ka hortagaan dhacdooyinka ama dibu soo noqoshada gaboodfalka iyo dayaca carruurta.

Waxaan rajaynaynaa in macluumaadkani uu ka caawiyo waalidiinta iyo daryeelayaasha inay fahmaan waxa dhacaya kadib warbixinta. Fadlan weydiiso shaqaalaha kiiskaaga CPS wixii su'aalo ah aan halkan lagugu siin jawaabtooda.

## Muxuu adeegahayga Adeegyada Ilaalinta Ilmaha (CPS) iila soo xiriiray?

Waxaa lagula soo xiriiray sababtoo ah Adeegyada Ilaalinta Ilmaha ee Waaxda Caafimaadka & Adeegyada Aadanaha waxay heleen warbixin suurtagalnimada gaboodfal ama dayac soo gaadhay carruur aad daryeesho.

## Waa maxay gaboodfalka iyo dayaca carruurta?

Marka la eego sharciga Main e, gaboodfalka ama dayacu waa khatar ku wajahan caafimaadka iyo daryeelka ilmaha ee xagga jidhka, maskaxda ama dareenka, gaboodfal ama dhiigmiirasho jinsi, ka joojinta baahiyaha aasaasiga ah ama in laga ilaalin waayo kuwan, marka la eego qofka masuulka ah ilmaha.

## Muxuu qof u samayn lahaa warbixin?

Sida ugu dhakhsaha badan, warbixinno ayaa loo sameeyaa si loo ogaado carruurta laga yaabo in lagu gaboodfalay ama la dayacay si badbaadadooda loo hubiyo. Calaamadaha qaar ay dadku ogaan karaan oo ay soo sheegi karaan:

- ilmaha oo qaba dhaawacyo shaki leh
- ilme yar oo kali ah looga tagay
- ilme qaba dhibaatooyinka xagga daryeelka caafimaadka ama baahiyo aan wax laga qaban

## Yaa warbixinta sameeyey?

Qof kasta ayaa laga yaabaa inuu sameeyo warbixinta. Dadka xirfadlayaasha ah qaarkood waxa looga baahan yahay inay sheegaan markii ay ogaadaan ama ay macquul tahay inay tuhmaan in ilme gaboodfal ama dayac ku dhacay ama ku dhici rabo.

Weriyuhu wuxuu codsan karaa in magaciisa ama magaceeda la sheegin. Marka warbixinada ku saabsan gaboodfal ama dayac ilme oo la tuhunsan yahay loo sheego si daacad ah, weriyayaasha waxa xaaraan ah in la qabsado.

## Maxaa dhacaya kadib marka warbixinta la sameeyo?

Ma aha iwicitaan kasta ee Khadka Telefoonka Ilaalinta Carruurta (1-800-452-1999) inuu horseedo booqashada shaqaalaha kiiska. Tusaale ahaan, wicitaanada qaarkood ma ahan kuwo ku saabsan gaboodfalka ama dayaca ilmaha. Marka wicitaanku uu ku saabsan yahay gaboodfal ama dayac ilme, waxa loo diraa xafiis ku dhaw meesha qoysku deggan yahay.

Waxay u badan tahay inaad hayso macluumaadkan ka qayb ahaan booqashada bilowga ah ee lala yeesho shaqaalaha kiiska. Shaqaalaha kiiska wuxuu ururiyaa macluumaadka si uu u ogaado haddii ay jiraan walaacyo laga qabo badqabka carruurta. Tani waxaa la yiraahdaa Baaritaanka Ilaalinta Carruurta. Halkan waxaad ka heli kartaa waxa laga filayo Baaritaanka Ilaalinta Carruurta:

## Baaritaanka Ilaalinta Carruurta

Shaqaalaha kiiska wuxuu:

- Ogaysiin waalidiinta inuu rabo inuu waraysto carruurta markii sharcigu dhigayo.
- Siin waalidka fursad ay su'aalo ku waydiiyaan oo macluumaad ku helaan. Waalidka ama daryeeluhu waxay dooran karaan inayna la hadlin adeegaha bulshada.
- La xiriiri doonaa xirfadlayaasha bulshada iyo dadka kale, xitaa marka waalidku doorto inuusan la kulmin ama la hadlin shaqaalaha kiiska.
- Go'aansan doonaa dhammaadka Baaritaanka Ilaalinta Carruurta haddii xadgudubka ama dayacaada la soo gudbiyey "la xaiijin karin", "la muujiyay," ama "la xaqiijin karo". "Aan caddayn" waxay ka dhigan tahay inuu gaboodfal ama dayac dhacay iyo inaannu dhicin inay isku dhaw yihiin. "Muuqda" waxay ka dhigan tahay inuu gaboodfal ama dayac dhacay laakiin uu sahlan yahay/badnayn. "Cad" waxay ka dhigan tahay in gaboodfal ama dayac darani uu dhacay.

## Warbixinada Aan Caddayn. Maxaa dhacaya?

- Shaqaalaha kiiska wuxuu isagoo warqad u dirayo waalidiinta u sheegi karaa in warbixinta xadgudubka ama dayacaada ay tahay mid aan la xaqiijin karin.
- Baahiyaha taagan: Shaqaalaha kiiska wuxuu la shaqeyn doonaa qoyska si loo ogaado adeegyo kasta ee qoysku ka qayb qaadan karo si kor loogu qaado xirfadaha iyo aqoonta qoyska ee ku saabsan ku dhaqanka waalidnimada. Adeegyadan waxaa ku jiri kara u gudbinta hay'adaha bulshada ee ku takhasusay la shaqeynta carruurta iyo qoysaska.
- Adeegyada Ilaalinta Carruurta waxay hayaan diiwaanka aan xaqiijin karin 5 sano.
- Haddii aan la helin wax warbixinno cusub ah muddadaa 5 sano, Adeegyada Ilaalinta Carruurta waxay burburinayaan warbixinta aan la xaqiijin karin iyo qiimeynta warbixintan.

## Warbixinada Muuqda. Maxaa dhacaya?

**Macluumaadka**. Shaqaalaha kiiska wuxuu isagoo warqad u dirayo waalidiinta ku wargaliyaa in warbixinta xadgudubka ama dayacaada la muujiyay. Warqadda waa inay sidoo kale ogaysiisaa waalidka xaqa ay u leeyihiin inay codsadaan dibu eegista go'aanka iyo sida loo codsado dibu eegista.

**Baahida socota**. Shaqaalaha kiiska wuxuu sii wadi karaa la shaqeynta qoyska si loo siiyo adeegyada loo baahan yahay si looga caawiyo ammaanka ilmaha, ama wuxuu u gudbin karaa qoyska adeegga ku saleysan bulshada. Tani waxay ka koobnaan kartaa Kulanka Kooxda Qoyska ee adeegaha bulshada iyo waalidka, iyo taageeradooda, si ay u sameeyaan Qorshaha Qoyska.

## Warbixinada Cad. Maxaa dhacaya?

**Macluumaadka** Adeegaha bulshadu waxay waalidka ugu sheegaan qoraal ahaan in warbixinta gaboodfalka ama dayacu ay tahay mid la xaqiijiyay. Warqadda waa inay sidoo kale ogaysiisaa waalidka xaqa ay u leeyihiin inay codsadaan dibu eegista go'aanka iyo sida loo codsado dibu eegista.

**Qorshaha Badbaadada**. Haddii ilmuhu ammaan ahayn, waalidiinta iyo shaqaalaha kiiska waxaa laga yaabaa inay la shaqeeyaan ugu yaraan hal qof oo kale oo ammaan ah, taageero leh si loo horumariyo qorshaha badqabka u oggolaanayo carruurta in ay ku sii jiraan daryeelka waalidka. Adeegaha bulshadu wuxuu sidoo kale raadin karaa adeegyo ka caawin kara qoyska qorshahooga badbaadada.

**Baahida socota**. Ka dib markii qorshaha badqabka la diyaariyo, shaqaalaha kiiska wuxuu sii wadi doonaa inuu la shaqeeyo qoyska si uu u siiyo adeegyada looga baahan yahay qoyska ee ka caawiyo inuu ilmuhu ammaan ahaado. Tani waxay ku lug yeelan doontaa Kulanka Kooxda iyo Qoyska ee shaqaalaha kiiska iyo waalidiinta, oo ay weheliso taageeradooda, si loo horumariyo Qorshaha Qoyska.

**Tallaabada Maxkamadda ee Mustaqbalka**. Marka qorshaha badqabka uusan ku filneyn inuu ilmaha ka ilaaliyo halista waxyeellada daran, ama haddii waalidku doorto inuusan raacin qorshaha badqabka, shaqaalaha kiiska wuxuu tixgelin doonaa tallaabooyinka kale ee loo baahan yahay si looga dhigo ilmaha mid ammaan ah Tani waxa kujiri kara faragelinta maxkamadda. Marka la eego sharcigaMaine, kaliya maxkamadaha ayaa laga yaabaa inay amar ku bixiso in ilmaha laga kaxeeyo waalidka.

## Maxaa dhacaya haddii aanan rabin nooc kasta oo baaris ama qiimayn ah oo la sameeyo?

Qoysaska intooda badan waxay la kulmaan oo ay la hadlaan shaqaalaha kiiska ee Adeegyada Ilaalinta Carruurta inta lagu jiro Baaritaanka Ilaalinta Carruurta. La kulanka shaqaalaha kiiska wuxuu fursad u siiyaa qoyska ay ku wadaagaan ra'yigooda, ku aqoonsadaan baahiyaha qoyska, ku waydiiyaan su'aalo, iyo helida jawaab-celin.

Haddii waalidiinta ama daryeelayaashu ay doortaan inaysan la hadlin adeegaha bulsho ama ay diidaan gelitaanka adeegaha bulshada ee gurigooda, qiimayntu way sii socon kartaa sida uu sharcigu farayo. Haddii ilmaha loo tixgaliyo inuu halis u yahay waxyeelo khatar ah, adeegaha bulshada Adeegyada Ilaalinta Ilmaha ayaa laga yaabaa inuu tixgaliyo la xiriirka booliiska si uu caawimo uga helo ama waydiisto maxkamadda inay qoyska wada shaqayn farto.

## Ilmahayga ma la qaadi doonaa?

Shaqaalaha kiiska ee Adeegyada Ilaalinta Carruurta ayaa ka caawin doona qoyskaaga badqabka cunugaaga (carruurtaada) gurigaaga dhexdiisa, mar kasta oo ay suuragal tahay. Haddii badbaadada ilmaha darteed, ay noqoto mid lagama maarmaan u ah maxkamadda inay kala kaxayso qoyska, markaa qofka lagu eedeeyey inuu ka masuulka yahay gaboodfalka ama dayacu wuxuu u baahan karaa inuu si ku-meel-gaar ah guriga uga tago, ama ilmaha ayaa u baahan kara inuu la noolaado qaraabo ama daryeelka korinta, ilaa inta ay badbaado noqonayso in ilmuhu ku soo laabto guriga.

## Waa maxay noocyada adeegyada ee la bixiyo marka gaboodfalka ama dayaca ilmuhu dhacayo?

Waxaa ka mid ah adeegyada sida khaaska ah loo bixiyo ee caawiyay qoysaska Baaritaanka Ilaalinta Carruurta, Kullanada Kooxda Qoyska, xannaano maalmeedka, la-talinta waalidiinta iyo carruurta, ku daaweynta guriga, daaweynta ku xadgudubka mukhaadaraadka, barnaamijyada rabshadaha qoyska, tababarka waalidnimada, kalkaalinta caafimaadka dadweynaha, caawinta guriyeynta iyo kharashaadka nolosha, iyo gaadiid-raaca.